**Qodobo ka soo baxay Xeer Ilaaliyeyaasha Guud ee Dawlad-goboleedyo badan oo xaqiijinaya Sharcinimada Hindisayaasha Caddaaladda Bey'adda**

Waxyaabaha soo socdaa waxay muujinayaan tusaalayaal ka socda Hagidda xeerarka iyo hawlaha ay hay'adaha dawliga ah iyo kuwa gaarka ahi ay qaadi karaan si loo horumariyo caddaaladda bey'ada.

| | |
|---|---|
| **Waxbarashada, Kaalmada Farsamada, iyo Taageerada Maalgelinta** | **Waxbarashada** – Barnaamijyada waxbarashada ee ururada aan faa'iido doonka ahayn, deegaan-hoosaadyada, iyo kuwa kale ee ku saabsan arrimaha caddaaladda deegaanka, dadaallada, iyo fursadaha maalgelinta. |
| | **Kaalmada Farsamada iyo Maalgelinta** – Tababarka, kaalmada farsamada, iyo taageerada maalgelinta si wax looga qabto caafimaadka deegaanka iyo waxyeelooyinka deegaanka ee isku-dhafan iyo/ama isku-darka ah. |
| **Wada-shaqaynta Dadweynaha iyo Ka-qaybgalka** | **Helitaanka Luuqadda** – Helitaanka luuqadda si loo hubiyo ka qaybgalka dadweynaha iyo horumarinta caafimaadka iyo badbaadada dhammaan bulshooyinka iyada oo loo marayo, tusaale ahaan, oggeysiisyo, wargelin, kulamo, digniino, iyo agab siin. |
| | **Gaarsiinta iyo Helitaanka** – Dhaqannada lagu hagaajinayo gelitaanka ka qaybgalka bulshada, oo ay ku jiraan dadka baahiyaha gaarka ah qaba ama xaaladda socdaalka ee nugul. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara bixinta soo xaadirista isku-dhafka ah, waqtiyo kulan oo kala duwan si loo daboolo baahiyaha shaqo-ama daryeel-bixinta, muddo dheer oo falanqayn ah, iyo gaaris qaab balaaran ah, yoolal leh, oo xili hore ah. |
| **Aqoonsiga Culayska iyo Falaanqaynta** | **Falaanqaynta Sayniska iyo Ururinta Xogta** – Kormeerka tayada hawada iyo biyaha, khariidaynta, cilmi baarista iyo falaanqaynta si xog loogu helo ka go'aan qaadashada bey'ada. |
| | **Xogta Saamaynta Is-biirsatay** – Xog ururinta isku-darka ah ee kiimikooyinka iyo kuwa aan kiimikada ahayn si loo fahmo sida wasakhowga iyo culaysyada kale u abuuraan saameyn dhibaato ku ah bulshooyin iyo dad gaar ah. |
| | **Xog-bulsheedka-Deegaanka** – Falaanqaynta xogta wasakhowga iyada oo ay weheliso xog-ururin kale si loo saadaaliyo saamaynta ay ku leedahay caafimaadka bini'aadamka, oo ay ku jiraan meelaha ay ku sugan yihiin dadka ay soo wajahaan khataro caafimaad oo sarreeya, walbahaarka dhanka dhaqaalaha, iyo helitaanka go'aamiyaasha bulshada ee caafimaadka (sida helitaanka daryeelka caafimaadka, guriyeynta, cuntada, adeegyada dadweynaha, gaadiidka, ama shaqooyinka). |
| | **Maamulka Wadajirka Bulshada ee Kor-joogteynta** – Lahaanshaha bulshada ama wada-maamulka la socodka wasakheynta taasoo bixinaysa xogta waqtiga-dhabta ah si loo fahmo culeysyada wasakhda iyo fulinta xadka qiiqa. |

| | |
|---|---|
| **Ka-hortagga iyo Yaraynta Soo-gaarista Wasakhowga** | **Helitaanka Biyo nadiif ah oo la Cabbo** – Barnaamijyada lagu ilaaliyo helitaanka biyo nadiif ah oo saafi ah, oo ay ku jiraan taageerada maalgelinta ee mashaariicda kaabayaasha dawladda hoose iyo qoyska, sida beddelka tuubooyinka balambamka, siinta biyaha marka ay jiraan dhibaatooyin, iyo baaritaanka ceelasha. |
| | **Hindisaha Guryaha Caafimaadka leh** – Xeerarka iyo barnaamijyada lagu hagaajinayo bey'ada gudaha iyadoo la dhimayo wasakhowga hawada, sunta, iyo cayayaanka. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara xeerarka qalabyada qiiqa sii daayo, maalgelinta kormeerayaasha hawada iyo nidaamyada sifaynta, iyo heerka dhimista sunta balambamta iyo si habsami u bixinta caaryada iyo dhaqangalinta. |
| | **Dib u eegista Cadaalada Bey'ada iyo/ama Saamaynta Isugaynta** – Cadaalada deegaanka ama saamaynta isbiirsaday ee dib u eegisyada iyo qiimaynta si loo aqoonsado loogana fogaado korodhka soo-gaadhista wasakhaynta ee oggolaanaysa ku isticmaalka xarumaha ama ku isticmaalka dhulka ee bulshooyinka horayba hoyga ugu ahaa ilaha wasakhda. |
| | **Qorshayaasha Dheefaha Bulshada iyo Heshiisyada (CBPs iyo CBAs)** – CBPs iyo CBA-yada si ay u caawiyaan hubinta faa'iidooyinka ku isticmaalka dhulka iyo go'aamada kaabaya bulshooyinka. Waxay awood u siin karaan horumariyayaasha iyo dawladaha hoose inay go'aansadaan tallaabooyinka sida yaraynta wasakhowga, shaqo helista, iyo ilaalinta bey'ada si wax looga qabto saamaynta caafimaadka deegaanka. |
| **U Diyaargarowga Cimilada iyo Adkeysiga** | **Kaabayaasha u adkeysiga cimilada** – Barnaamijyada adkeysiga cimilada ee ilaaliya bulshooyinka si aan qiyaas lahayn u saamaysay saameynta isbeddelka cimilada. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara laalista daadadka, sare u qaadista kahortagga biyo culus iyo barafka, yaraynta kulaylka (tusaale, geedaha, saqafyada qaboow, meelaha cagaaran), hagaajinta guryaha ee meelaha nugul, iyo Baraha adkeysiga bulshada si ay u bixiyaan gargaar koronto, qaboojin, cunto, iyo gargaar caafimaad inta lagu jiro iyo ka dib cimilada aadka u daran. |
| **Dhaqangelinta iyo Xalalka** | **Kooxaha Shaqada & Is-dhexgalka Hay'adaha** – Kooxaha shaqada si ay isu keenaan hay'adaha deegaanka, gobolka, iyo kuwa maxalliga ah si ay isugu dubbaridaan kormeerka, soo saaraan tixraacyada, oo ay qabtaan shirar dadweyne si loo hagaajiyo fulinta, oo ay ku jirto ka jawaabista warbixinnada xadgudubyada iyo la shaqeynta iskaashiga bulshooyinka ay saameeyeen. |
| | **Iskaashatada Dhaqangelinta Bulshada iyo Wax ku biirinta** – Baaritaannada hay'adda dadwaynaha iyo tallaabooyinka dhaqangelinta ee ku salaysan xogta kooxaha bulshada iyada oo loo marayo xirmooyinka tijaabada lagu qaado ee goobta lala tago iyo qalabka muunada si loo tijaabiyo wasakhowga biyaha iyo hawada. Hay'adaha dawliga ah waxay siin karaan fursado la heli karo dadka deegaanka si ay u bixiyaan maragta tooska ee bulshada oo ku saabsan suurtagalnimada ama xadgudubyada la sheegayo inta lagu jiro dhageysiga dhaqan gelinta. |
| | **Xalka Ku salaysan Bulshada** – Hay'adaha dawladdu waxay xal u raadin karaan ku-xadgudubyada deegaanka taasoo keenaysa in dheefo loo qoondeeyo bulshooyinka ay saamaysay. |
| | **U doodista Cadaaladda Deegaanka iyo Cimilada** – Hay'adaha gaarka ah waxay leeyihiin xaqa ay ku hormariyaan hadafyada cadaalada deegaanka iyo cimilada iyada oo loo marayo abaabulka bulshada iyo u doodista xeerka. |